WAAXDA AMMAANKA BULSHADA EE OHIO
XAFIISKA GAADIIDKA MOTOORKA LEH

# LIISKA DOKUMEENTIGA LA AQBALAYO
# AQOONSIGA KAARKA CABASHADA EE DL-

| Si aad u caddeyso aqoonsiga, waa in aad keento caddeynta shanta waxyaabood ee soo socda: **1- Magaca Buuxa ee Sharciga ah; 2 - Taariikhda Dhalashada; 3 - Degaankaaga Rasmiga ah ee US; 4 - Lambarka Social Security; iyo 5 - Cinwaanka Jidka ee Ohio** Si aad u caddeyso shey, sheygu waa inuu ku jiraa dukumiintiga. Hal dukumiinti oo ku jira liiskan ayaa la keeni karaa nuqulkiis ama caddeynta cusbooneysiintiisa (ma khuseeyo dadka aan ahayn muwaadiniin Maraykan ah). **LABO** dukumiinti, oo ka yimid meelo kala duwan, oo caddeynaya Ciwaanka Wadada Ohio oo ku qoran Liiska Dukuumitiyada La Aqbalo ayaa loo baahan yahay si loo cadeeyo inaad degan tahay Ohio. **Si aad u hesho Liiska Dukumiintiyada La Aqbalo oo Isku dhafan booqo https://www.bmv.ohio.gov/dl-identity-documents.aspx** | MAGACA BUUXA EE SHARCIGA AH* | TAARIIKHDA DHALASHADA | DEGGANAANSHAHA SHARCIGA AH | LAMBARKA SOCIAL SECURITY | CINWAANKA JIDKA EE OHIO |
|---|---|---|---|---|---|
| **SHAHAADADA DHALASHADA** - Ama nuqulkii asli ah ama nuqul leh caddeyn, oo ay bixisay hay'ad dawladeedka arrinta ku shaqo leh ee gobol kasta, dhul kasta, ama xaduudaha uu xukumo Maraykanku | x | x | x | | |
| **BAASABOORKA MARAYKANKA ama KAARKA BAASABOORKA MARAYKANKA** – Shaqeynaya oo aan dhicin oo sawir leh | x | x | x | | |
| **WARBIXINTA KU DHALASHADA DIBADA EE QUNSULIYADDA** – oo ay bixisay Waaxda Arrimaha Dibadda ee Maraykanka, Foomka FS-240, DS-1350 ama FS-545 | x | x | x | | |
| **SHAHAADADA DHALASHO QAADASHADA** – Foomka N-550 ama Foomka N-570 ee ay bixiso DHS | x | x | x | | |
| **SHAHAADADA MUWAADINIMADA** – Foomka N-560 ama Foomka N-561 ee ay bixiso DHS | x | x | x | | |
| **KAARKA DEGANAANSHAHA RASMIGA AH****– Foomka I-1551 oo shaqaynaaya isla markaana aan dhicin oo ay soo saartay Waaxda Amaanka Gudaha ee Maraykanka (DHS), Adeegyada muwaadinimada Maraykanka (USCIS) ama Adeegga Socdaalka iyo Dhalasho-qaadashada (INS) | x | x | x | | |
| **KIISKA I-797 NOOCA N-565 (CODSIGA CUSBOONEYSIINTA DUKUMIINTIGA DHALASHO QAADASHADA/MUWAADINIMADA)** – Oo wadata ogeysiiska nooca risiidka, ansixinta ama ka dhaafida kharashka | x | x | x | | x |
| **BAASABOOR SHISHEEYE OO LEH FIISO** – Baasaboor shisheeye oo aan dhicin isla markaana leh fiisada Maraykanka oo sax ah, aan dhicin oo caddeyn leh uuna la socdo foomka I-94 oo la aqbalay kaasoo muujinaaya markii u danbaysay ee codsaduhu soo galay Maraykanka. Waa inuu sidoo kale keenaa dukumiinti kaabid ah*** oo asli ah oo sax ah ayna soo saartay USCIS ama ama wakaalada masuuliyada kala wareegta USCIS taasoo muujinaysa taariikhaha qofku sharciyada ku joogay wadanka | x | x | | | |
| **DUKUMIINTIGA OGGOLAANSHAHA SHAQADA** – EAD sax ah oon dhicin oo ay soo saartay DHS, foomka I-766 ama foomka I-688B. Waa inuu sidoo kale la socdaa dukumiinti kaabis ah*** oo sax ah rasmina ah oo ay soo saartay USCIS ama wakaalad hoos tagta USCIS oo muujinaaya taariikhaha uu qofku sharci ku joogay wadanka | x | x | | | |
| *****DUKUMIINTIYADA KAABISTA AH EE USCIS OO MUUJINAAYA INAAD WADANKA SHARCI KU JOOGTO** – DS-2019, I-20, I-766, I-551, I-797 oo leh noocyada kala duwan ee kiiska, I-94 (Magangalyo doon, Baxsad, Qaxooti), MAVNI, PPR, ama dukumiintiyada kale ee ay soo saarto USCIS Diiwaangeliyuhuna u aqoonsado kuwo la aqbali karo. | | | x | | x |
| **KAADHKA SOCIAL SECURITY** – Ay bixisay Maamulka Social Security (SSA); kaadhka birta ah lama oggola | | | | x | |
| **W-2 (CADDEYNTA MUSHAHARKA IYO CANSHUURTA)** – Oo muujinaaya Lambarka Social Security; ma noqon karo mid gacanta lagu qoray. Waa inuu noqdaa sannad canshuureedka hadda ama kii hore | | | | x | x |
| **FOOMKA 1099** – Oo muujinaaya Lambarka Buuxa ee Social Security; ma noqon karo mid gacanta lagu qoray. Waa inuu noqdaa sannad canshuureedka hadda ama kii hore | | | | x | x |
| **RISIIDKA MUSHAHARKA** – Oo muujinaaya magaca codsadaha iyo Lambarka buuxa ee Social Security; ma noqon karo mid gacanta lagu qoray. Waa inuu noqdaa sannad canshuureedka hadda ama kii hore | | | | x | x |

***DUKUMIINTIYADA DHEERAADKA AH EE CADAYNTA MAGACA SHARCIGA AH**

**Magacaaga buuxa ee hadda ee sharciga ahi ma lamid baa magaca ku qoran dukumiintigaaga aqoonsiga?**

Haddii aan dukumiintiyada lasoo bandhigay aysan caddeyn magaca buuxa ee sharciga ah iyo/ama aysan waafaqsanayn diiwaanka hadda ee BMV, dukumiintiyo dheeraad ah waa in lasoo bandhigaa.

- Nuqulka Asliga ah ama La Xaqiijiyay ee **Shahaadada Guurka** ama **Ruqsada Guurka****
- Nuqulka La Xaqiijiyay ee **Shahaadada Furniinka**, **Kala-taga**, ama **baabi'inta guurka****
- Nuqul sharciyeysan oo ah **Amarka Maxkamadda ee Magac Beddelidda**

****OGOOW**: Haddii aad soo martay wax ka badan hal guur, waxaad u baahan kartaa inaad keento dukumiintiyada guur iyo/ama furiin kasta si loogu xiro shahaadaada dhalashada, baasaboorkaaga ama dukumiintiyada USCIS looguna xiriiriyo magacaaga hadda ee sharciga ah. Kaadhka Deganaanshaha Rasmiga ah (Foomka I-551) waa inuu ku qoran yahay magaca hadda ee sharciga ahi



DADWEYNAHA

| **Labo dukumiinti** oo uu ku qoran yahay magacaaga iyo Ciwaanka Wadada Ohio, oo kasoo baxay Liiska Dukumiintiyada La Aqbalo<br>**CADDEYNTA: 5 – Ciwaanka Wadada Ohio:** | MAGACA BUUXA EE SHARCIGA AH* | TAARIIKHDA DHALASHADA | DEGGANAANSHAHA SHARCIGA AH | SSN | CIWAANKA OHIO |
|---|---|---|---|---|---|
| **KAARARKA BOOSTADA OHIO BMV AMA CADDEYNTA MBV** – Oo ay soo saarto Laanta Gaadiidka Matoorka Ku shaqeeya ee Ohio | | | | | x |
| **BAYAANKA TAAGEERADA CARRUURTA AMA XOGTA KOOBAN EE KOONTADA** – Oo ay soo saartay Waaxda Shaqada iyo Adeegyada QOyska ee Ohio | | | | | x |
| **BAYAANKA HAY'AD DHAQAALE –** Caddeynta jeega, keydka, maalgelinta ama baanka onleynka ah; oo lasoo saaray 12 kii bilood ee lasoo dhaafay gudahood | | | | | x |
| **BUUXINTA CANSHUUR CELINTA DAKHLIGA EE FEDERAALKA AMA OHIO –** Sannad canshuureedka hadda ama kii hore, oo leh caddeynta buuxinta foomka | | | | | x |
| **AMARKA MAXKAMADDA EE SII DEYNTA, TIJAABADA,ama SIIDEYNTA QASABKA AH** | | | | | x |
| **KIRAYSTAHA, MULKIILAHA GURIGA, AMA XEERKA CAYMISKA GAARIGA AMA KAARKA** – Hadda shaqaynaaya oo sax ah | | | | | x |
| **DIIWAANKA AMA XOGTA TACLIIMEED EE DUGSIGA** - Waa inuu ahaadaa mid asli ah ama nuqul la xaqiijiyay | | | | | x |
| **WARAAQ KA TIMID KULLIYAD AMA JAAMACAD –** Waraaqda waa inuu saxiixaa qof madax ah oo jooga kulliyadaas ama jaamacadaas | | | | | x |
| **HESHIISKA HAFTADA AMAAHDA -** Ee bangi ama hay'ad kale oo maaliyadeed | | | | | x |
| **BAYAANKA KAARKA DEYNTA** – Oo ay soo saareen shirkad kaarka deynta oo weyn ama dukaanka tafaariiqda; oo la soo saaray 12-kii casho ee tagay gudahood | | | | | x |
| **CADDEYNTA KOONTADA DEYNTA GURIGA –** Oo kasoo baxday baanka ama xarun kale oo dhaqaale; oo lasoo saaray 12 bilood gudahood | | | | | x |
| **AQOONSIGA GAARIGA EE OHIO ama DIIWAAN GELINTA** | | | | | x |
| **CADAYNTA ama RISIIDKA MUSHAHARKA –** Oo lasoo saaray 12 kii bilood ee lasoo dhaafay | | | | | x |
| **RUQSADA MIHNADLAHA** – Oo ay soo saartay wakaalad dawladeed (waa inuu ku qoran yahay ciwaan Ohio ku yaala) | | | | | x |
| **CADDEYNTA MULKIYADA GURIGA –** Sabarloogada Guriga, Biilka Canshuurta Guriga ama Bayaanka Canshuurta ee Xisaabiyaha | | | | | x |
| **CANSHUURTA IIBKA OHIO ama RUQSADA GANACSIGA** | | | | | x |
| **KAARKA AQOOSIGA DIIWAANGELINTA ADEEGYADA GAARKA** | | | | | x |
| **WARAAQAHA MAAMULKA SOOSHIYAAL SIKIYUURITGA** | | | | | x |
| **BIILKA ADEEGGA GURIGA** – Tusaale: korontada, gaaska, taleefanka, biyaha, bulaacada, fiilada, satalaydka, kuleeliyaha, saliida dabka, ama aalada gaas cadaha, iwm. lana soo saaray 12 kii bilood ee lasoo dhaafay gudahood (biilasha adeegyada guriga ee ka yimaada 2 shirkadood oo kala duwan ayaa ku filan 2-da caddeyn ee loo baahan yahay ee dukumiintiga ciwaanka) | | | | | x |
| **SHARCIGA QAADASHADA HUBKA OHIO** – Fasaxa Ohio bixisay oo shaqaynaya | | | | | x |
| **CADDEYNTA GUNNOOYINKA CAAWIMAADA DADWEYNAHA** – Oo ay soo saartay wakaalad dawladeed 12 kii bilood ee lasoo dhaafay | | | | | x |
| **WARAAQDA MAAMULKA AMMAANKA GAADIIDKA (TSA)** | | | | | x |
| **RUQSADA DARAWALKA EE OHIO, OGGOLAANSHAHA ARDAYGA ama KAARKA AQOONSIGA –** Sax ah, ama dhacday muddo ka yar 6 bilood kahor | | | | | x |
| **BMV 2336 "CADDEEYNTA DEGENAAASHAHA OHIO - BAYAAN LA XAQIIJIYAY" oo xaaladahan soo socda ah:**<br>1) Haddii uu yahay ilmo yar oo ku tiirsane ah, waraaq ka timid WAALIDKA AMA MASUULKA ILMAHA oo haysta caddeynta isla ciwaankaas, oo lagu saxiixay asagoo la joogo sarkaal ka socda BMV. Waalidka ama masuulka sharciga ah waa inuu keenaa caddeynta aqoonsiga, labo foomamka caddeynta ciwaanka wadada Ohio, iyo xiriirka ka dhaxeeya ilmaha ku tiirsansaha ah.<br>2) Haddii uu yahay qof xaas leh, waa in laga keenaa xaaska codsadaha oo haysta isla caddeynta ciwaankaas, laguna saxiixo marqaatiga sarkaalka BMV. Xaasku waa inuu keenaa caddeynta aqoonsiga, labo foomamka caddeynta ciwaanka wadada Ohio, iyo caddeynta xiriirka guurka.<br>3) Haddii uu qofku deggan yahay xannaano, qoraal rasmi ah oo degganaasho oo uu soo saaray masuulka xannaanadu. Fiiro Gaar ah: Hal waraaq oo dheeraad ah, oo meel kale ka timid, ayaa sidoo kale loo baahan yahay oo caddeynaysa Cinwaanka Jidka Ohio. | | | | | x |

**OGOOW:** RUQSADA DARAWALKA EE GOBALKU BAXSHO - Oo uu soo saaray gobal, deegaan, ama goob hoos tagta Maraykanka, oo leh sawir, sax ah isla markaana aan dhicin ayaa la aqbali karaa si looga saaro meesha shuruudaha imtixaanka darawalka.



**DADWEYNAHA**